# Maalgelin Daymeed oo La Codsaday ee Caafimaadka, Badbaadada iyo Casriyeynta
# Su'aalaha Inta badan la Iswaydiiyo

**Waa maxay ujeedada laga leeyahay maalgelintan daymeed ee la codsaday?**
Qiyaastii, dhismayaasha PPS Dugsiyada Dadweynaha Portland da'doodu waa 77 sano jir[1]. Qaarka mid ah waxaa la dhisay in ka badan 100 sano ka hor; in ka badan kala barna waxaa la dhisay ka hor 1940-kii. Ka hor maalgelintii daymeed ee 2012-kii ee kor u qaaday dugsiyada Franklin, Roosevelt, Grant iyo Faubion, kaliya laba dugsi ayaa la dhisay 35 sano ee la soo dhaafay.

Dugsiyo badan ayaa u baahan dacaytir iyo hagaajin si ardayda loo siiyo xarumo waxbarasho oo casri ah iyo si wax looga qabto xaaladaha aan badbaadada ahayn. Baaritaan la sameeyay xagaagii la soo dhaafay wuxuu muujiyay in boqolkiiba 99 dugsiyada degmada ku yaala ay ugu yaraan leeyihiin hal tuubada biyaha qabow qaada oo ay ku jirto kiimikada lead oo qiyaasteedu ka sarayso heerarka EPA ee la aqbali karo. Kuwo badan oo ka mid ah saqafyada dugsiyada ayaa dhaafay wakhtigii ay waxtarka yeelan lahaayeen iyagoo qaarka mid ah ay si joogta ah biyuhu uga soo daataan. Nidaamyada badbaadada dabka ee dusgiyada intooda badan ayaa ah kuwo aan ku filnayn, iyadoo 42 ka mid ah dugsiyadu aanay lahayn nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo.

Marka muddo la joogo, Dugsiyada Dadweynaha Oregon waxay qorshaynaysaa in ay casriyeyso isla markaana kordhiso dugsi kasta iyadoo la adeegsanayo lacago deyn ah oo lagu maalgelinayo dhismaha, kuwaasi oo dugsiyada kor u soo qaadaya soona gaarsiinaya xeerarka u yaala dhismaha ee hada jira iyo heerarka waxbarasho.

2012-kii, cod bixiyayaashu waxay oggolaadeen $482 malyuun oo maalgelin daymeed ah oo lagu kharash gareeyay dib u cusboonaysiinta Dugsiga Sare ee Franklin, Dugsiga Sare ee Grant iyo Dugsiga Sare ee Roosevelt iyo bedelka dugsiga Faubion PreK-8. Sidoo kale waxaa lacagteeda lagu bixiyay mashaariicda horumarineed ee xagaaga ee 52 dugsi, oo ay ka mid yihiin dib u cusboonaysiinta fasallada sayniska, saqafyo cusub, iyo ku darida qalabka dhul gariirka loogu talagalay iyo xoojinta, iyo sidoo kale lacag loo qorsheeyay casriyeynta Benson, Lincoln, iyo Dugsiga Sare ee Madison iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg.

Haddii ay Maajo oggolaadaan cod bixiyayaashu, maalgelin daymeed oo la codsaday ee Caafimaadka, Badbaadada iyo Casriyeynta waxaa lagu kharash garayn doonaa bixinta lacagta ama dib u helidda kharash lacageed oo dulsaarkiisu hooseeyo; oo ay ka mid yihiin mashaariicda la codsaday oo:

- Yareeya ama baabi'iya soo gaarista waxyaabaha halista ah, oo ay ka mid yihiin kiimikada lead, asbestos, iyo radon;
- Lagu hagaajinayo gambaleelka badbaadada ee dabka sheega iyo nidaamyada biyaha wax lagu rusheeyo;
- Kordhiya gelitaanka dugsiga ee dadka naafada ah;
- Dayactir ku samaynaya ama lagu bedelayo saqafyada dugsiga ee biyaha soo daadinaya, dhaawucu soo gaaray ama xaalkoodu sii xumaanayo iyo wanaajinta waxyaalaha la xiriira dhul gariirka;
- Lagu hagaajinayo badbaadada iyo ammaanka dugsiga;
- Dib loogu cusboonaysiinayo ama lagu bedelayo dugsiyada, ay ka midka yihiin Benson, Lincoln, Madison, iyo Kellogg.

Intaasi waxaa dheer, haddii la oggolaado, maalgelinta daymeed ee la codsaday ee 2017-ka waxaa lagu kharash garayn doonaa qorshaha casriyeynta Dugsiyada Sare ee Cleveland, Jefferson, iyo Wilson.

**Lacag intee le'eg ayay maalgelintan daymeed ugu kici doontaa canshuur bixiyayaasha?**
Heerka cashuurta la saaray ee la xiriira maalgelinta daymeed ee la codsaday ee la bixinayo waxaa lagu qiyaasay $0.68 oo ah $1,000-kii dollarba ee qiimaha la qiimeeyay in ka badan 30 sano. Heerka cashuurta la saaray waxaa lagu qiyaasay in ay noqoto 1.40 oo ah $1,000-kii dollarba afarta sanadood ee u horeysa, iyadoo hoos u dhacaysa wixii intaasi ka dambeeya. Guri lagu qiimeeyay $200,000 qiimaha kharashka ee sanadka ee bilowga ah wuxuu noqon doonaa qiyaastii $280. Iyadoo qiyaasta guud ee kharashku tahay $136 sanadkii. Wadarta lacagta guud ee maalgelinta daymeed ee lagu oggolaaday xeerkani kama badan karo $790 malyuun.

[1] *Qiyaasta da'da dhismayaasha PPS waxay ku salaysan yihiin diiwaano uu keydiyay ee laga helay Xafiiska Maamulka Hantida.  Tiradani sidoo kale waxay tixraac u tahay Qoraalkii Caafimaadka iyo Badbaadada ee ay Guddiga Waxbarashada u soo bandhigay Sargaalka ku meel gaarka ah ee Madaxa ka ah Hawlgalka.*

**Muddo intee le'eg ayay maalgelintan daymeed ee la codsaday ay ahaan doontaa mid dhaqan gal ah? Muddo intee le'eg ayaan arki doonaa koror ku yimaada canshuuraha hantideena?**
Maalgelinta daymeed waxay da'deeda loogu talagalay ku gaari doontaa 30 sano ama wax ka yar laga bilaabo taariikhda soo saarista maalgelinta daymeed waxaana laga yaabaa in si taxane ah loo soo saaro mid ama ka badan.

**Lacag intee le'eg oo ka mid ah maalgelinta daymeed ee la codsaday ayaa loo isticmaali doonaa mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada?**
Qiyaastii  $324 malyuun oo ka mid ah maalgelinta daymeed ee la codsaday ayaa lagu maalgelin doonaa mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada: Qiyaastii boqolkiiba 30% oo ah miisaaniyadda mid kasta oo ka mid ah afarta mashruuc ee casriyeynta waxay aadi doontaa  mashaariicda caafimaadka iyo badbaadada, iyada oo ugu yaraan $150 malyuun oo dheeraad ahi ay aadi doonto xallinta walwalka la xiriira caafimaadka iyo badbaadada ee dugsiyada ku baahsan degmada.

**PPS ma heli kartaa hab kale oo ay u bixiso dhaqaalaha mashaariicdani? [tusaale, Waa maxay Sababta Lacagaha Deynta ah?]**
Maamulka canshuurta ee dugsiyada degmada waxaa xaddidaya sharciga.  Wakhtigan la joogo, PPS waxay isticmaashaa canshuuraha  hantida iyo canshuuraha la saaro wax dhisida si wax looga qabto baahiyaha lacageed.  Canshuuraha la saaro dhismaha waxaa la helaa marka  Magaalada Portland ay bixiso ruqsadda oggolaanshaha ee wax dhisid.

PPS waxay ka faa'iideysanaysaa lacagta maalgelinta daymeed ee la codsaday iyada oo isticmaalaysa $8 malyuun oo ah lacagta deeqda ah ee gobolka.   Intaasi waxaa dheer, waxaa jira lacago deeq ah oo gobolku bixiyo oo loogu talagalay ujeedooyin gaar ah, iyada oo PPS ay dalbato marka ay fursadahani jiraan.

**Waa maxay inta ay le'eg tahay baahida dugsiyada PPS?**
Sanadkii la soo dhaafay, shaqaalaha farsamada ee PPS waxay sidoo kale qiimayn ku sameeyeen baahida caafimaad iyo badbaado ee dugsiyada guud ahaan kow iyo tobban meelood—laga soo bilaabo biyaha la cabo iyo rinjiga ilaa laga gaarayo badbaadada dabka—si ay ugu wargeliyaan wanaajinta waxyaalaha muhiimada la siinayo ee caafimaadka muhiimka ah iyo badbaadada dheeraadka ah ee wakhtigan maalgelinta daymeed.  Kharashka ku baxaya in si buuxda loo sahlo dhammaan kow iyo tobbanka meelood ee caafimaadka iyo badbaadada qiyaastiisu waxay dhan tahay $1.6 bilyan.

**Waa maxay sababta aydaan u codsanayn maalgelinta daymeed oo lacagteedu buuxdo oo la xiriira baahida caafimaad iyo badbaado ee jirta?**
$150 malyuun ee maalgelinta dheeraadka ah ee caafimaadka iyo badbaadadu waxay wax ka qaban doontaa baahiyaha sida degdega ah loogu baahan yahay, oo ay ka mid yihiin xallinta arrimaha kiimikada lead ee ku jirta biyaha iyo rinjiga, kiimikada radon ee dugsi kasta oo ay saameysay.

Si kastaba ha ahaatee, suurta gal ma aha in maalgelintan daymeed ee $1.6 bilyan oo dhan wax lagaga qabto baahiyaha caafimaad iyo badbaado, laba sababood awgood: Ta koowaad, waa mid qiimo ahaan macquul ah in wax laga qabto qaar ka mid ah baahiyaha caafimaad iyo badbaado iyaga oo qayb ka ah dib u dhiska iyo casriyeynta buuxda, iyada oo ay la xiriirto dhismaha weyn iyo helidda muddada dheer ee loo baahan yahay si guul buuxda looga gaaro mashaariicda.    Degmadu waxay leedahay qorshe muddada dheer ah oo ay  dib ugu cusboonaysiinayso isla markaana ku casriyeynayso dugsiyada oo dhan.

Ta labaad, waxaa jira xaddidnaan muuqata oo la xiriirta tirada shaqada waxa la dhisayo ee ujeedadii laga lahaa lagu gaari karo muddo ku aadan 6-8 sanadood ee wakhtiga loogu talagalay maalgelinta daymeed, iyada oo ay ugu wacan tahay helitaanka shaqaalaha dhismaha oo xirfad leh, iyo sidoo kale ka hareer shaqaynta jadwalada dugsiga. Inta badan shaqada caafimaadka iyo badbaadada waxaa ujeedadii laga lahaa la gaari karaa marka aanay ardaydu joogin dhismaha, taasi oo xaddidaysa tirada wakhtiga la helayo sanadka si wax looga qabto arrimahani.

**Sidee baanu ku garan karnaa in PPS ay lacagta u isticmaalayso sidii ay degmadu fartay in ay u isticmaalayso?**
Maalgelinta daymeed ee 2012-kii, PPS waxay samaysay Guddiga La Xisaabtanka Maalgelinta Daymeed, guddi toddoba xubnood ah oo ka kooban xubno ka tirsan bulshada oo leh sumcad dhanka caddaalada ah iyo hufnaan iyo waayo-aragnimo la xiriirta naqshadaynta dhismaha, wax dhisida, qandaraasyada dadweynaha, miisaaniyadda, iyo/ama hanti dhowrka. Haddii ay oggolaadaan cod bixiyayaashu, maalgelin daymeed oo la codsaday ee Caafimaadka, Badbaadada iyo Casriyeynta waxay ku baaqeysaa in la sii wado BAC.  BAC waxay kulantaa saddexdii biloodba mar si u ay dib ugu eegaan mashaariicda dhaqaalahooda lagu bixiyay maalgelinta daymeed iyaga oo Guddiga Dugsiga talo siiya, taasi oo ku saabsan:

- In dakhliga laga helo maalgelinta daymeed kaliya lagu kharash gareeyo ujeedadii maalgelinta daymeed markii horeba loo oggolaaday;
- In lala simo hadafka iyo mabaa'diida degmada ee Qorshaha Muqtaqbalka Dheer ee Xarumaha;

- In lala simo hadafka Siyaasadda Sinnaanshaha Ganacsiga;
- Yaraynta kharashyada dayactirka iyo dhismaha iyada oo la kordhinayo tayada shaqo;
- Ilaalinta meelaha taariikhiga ah iyo dib u cusboonaysiinta dugsiga;
- Iskaashiga lacageed ee suurta galka ah ee loogu talagalay wadajirka iyo isticmaalka la wadaagayo xarumaha PPS;
- Hirgelinta habab ku habboon oo wax lagaga qabanayo arrimaha la xiriira waxyaalaha dhul gariirka loogu talagalay;
- Raacida shuruudaha ADA.

**Waa maxay lacagta deynta ah oo lagu maalgelinayo dhismaha ee PPS ay hore u isticmaashay?**
Codbixiyayaasha PPS waxay taageereen laba xeer oo ku saabsan maalgelinta daymeed 22 sano ee la soo dhaafay. 1995-kii, codbixayayaashu waxay ansixiyeen maalgelin daymeed oo lagu dhisay Dugsiga Hoose ee Forest Park; iyada oo la bixiyay kambiyuutarada fasalka; dib u cusboonaysiin lagu sameeyay waxyaalaha dhul gariirka loogu talagalay oo ka dhacday 53 dugsi, badbaadada dabka ee 45 dugsi oo la kordhiyay iyada oo la adeegsanayo hagaajin lagu sameeyay nalalka degdega ah, gambaleelka badbaadada ee dabka sheega, biyaha wax lagu rusheeyo iyo la dagaalanka qiiqa; iyada oo dayactir weyn dhismaha lagu sameeyay.

2012-kii, cod bixiyayaasha Portland waxay oggolaadeen Heshiiskii Hagaajinta Dhismaha Dugsiga ee dib loogu cusboonaysiiyay Dugsiga Sare ee Franklin, Dugsiga Sare ee Grant iyo Dugsiga Sare ee Roosevelt iyo bedelkii lagu sameeyay dugsiga Faubion PreK-8; iyada oo loo la bilaabay qorshaynta dib u cusboonaysiinta dhammaan dugsiyada sare ee degmada ku yaala sanadaha soo socdo; bedelka saqafyada dugsiga ee biyaha soo daadinaya, dhaawucu soo gaaray ama xaalkoodu sii xumaanayo; xoojinta dugsiyada ee lagaga hortagayo dhul gariirka; dib u bixinta deynta hore oo lagu bixiyay bedelka sagaal saqaf, 47 qalabka wax lagu diiriyo, iyo Dugsiga Rosa Park; kordhinta gelitaanka dugsiyada ee loogu talagalay ardayda, macallimiinta iyo dadka soo booqda ee naafada ah; iyo dib u cusboonaysiinta lagu sameeyay fasallada sayniska ee dugsiyada fasalka dhexe.

**Waa maxay [School] loogu dari waayay codsiyada maalgelinta daymeed?**
Qorshaha Muqtaqbalka Dheer ee Xarumaha, ee la dejiyay 2012-kii, wuxuu gogosha u xaaray si buuxda u casriyeynta dhammaan dugsiyada sare ee degmada ku yaala. Sida ku cad qorshahaasi, iyo shaqada guddiga horumarinta maalgelinta daymeed ee 2014-kii, dugsiyada sare waxaa loo qorsheeyay in marka hore la casriyeeyo.

Maalgelintii daymeed ee cod bixiyayaashu oggolaadeen 2012-kii waxaa lagu kharash gareeyay casriyeynta dugsiyada Franklin, Roosevelt, Grant iyo Faubion iyada oo lagu bixiyay qorshe weyn oo dhaqaale oo loogu talagalay Benson, Madison, Lincoln iyo Kellogg. Haddii ay oggolaadaan cod bixiyayaashu, maalgelin daymeed oo la codsaday ee Caafimaadka, Badbaadada iyo Casriyeynta waxaa lagu kharash garayn doonaa qorshaha casriyeynta Cleveland, Jefferson, iyo Wilson.

Inkasta oo tirada dugsiyada si buuxda dib loogu dhisi karo ama loogu casriyeyn karo nidaamkan maalgelinta daymeed uu yahay mid xaddidan, $150 malyuun oo ka mid ah maalgelinta daymeed waxaa loo isticmaali doonaa arrimaha la xiriira caafimaadka iyo badbaadada, sida kiimikada lead ee ku jirta biyaha iyo rinjiga, ee dugsiyada ku baahsan degmada.

**Maxaa dhacaya haddi maalgelintan daymeed ee la codsaday la ansixin waayo? Sidee baad u dhamaystiri doontaan mashaariicdan caafimaadka iyo badbaadada la xiriira oo dhan isla markaana u xaqiijin doontaan badbaadada carruurteena?**
PPS way sii wadi doontaa in ay jawaab ka bixiso xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka iyo badbaadada la xiriira isla markaana qaado tallaabooyin lagu xaqiijinayo in dugsiyadu noqdaan kuwo ammaan ah. Laakiin, PPS ma yeelan doonto lacag jirta oo la heli karo si ay u bilowdo qorshe muddo dheer socda oo lagu yaraynayo khatarahani.

**Haddii la oggolaado maalgelinta daymeed ee la codsaday in la ansixiyo, sidee baan u ogaanaynaa in loo ilaalin doono dugsiyada dib loo dhisi doono ama la casriyeyn doono si arrimaha caafimaadka iyo badbaadada la xiriiraa aanay u noqon dhibaato mustaqbalka?**
Guddiga dugsiga ayaa oggolaatay siyaasadda Dib u cusboonaysiinta Hantida Lacageed, taasi oo dakhliga hada la helayo u qoondeysa in lagu kharash gareeyo dayactirka ka hortagga iyo dacaytirka Forest Park, Rosa Parks iyo dugsiyada kasta ee dib loo cusboonaysiin doono mustaqbalka.

Dhismayaasha dib loo cusboonaysiisay waxay hoos u dhigaan kharashyada dayactirka ee PPS, iyada oo dhismayaasha cusubi u baahan yihiin ilaalin iyo dayactir kooban.

**Haddii la oggolaado maalgelinta daymeed ee la codsaday in la ansixiyo, ma jiraa qorshe tamarta la cusboonaysiin karo loogu talagalay si loo xaqiijiyo in dugsiyada dib loo dhisi doono ama la casriyeyn doona ay yeeshaan tamar ku filan?**
Sida uu dhigayo Qorshaha Muqtaqbalka Dheer ee Xarumaha ee la dejiyay 2012-kii, dhammaan dugsiyada la casriyeeyay waa in ay ugu yaraan buuxiyaan shuruudaha u yaala nidaamka qalinka ee "LEED silver standard" iyada oo dhammaan dugsiyada (ay ku jiraan dugsiyada dib loo dhisay) ay tahay in ay ugu yaraan buuxiyaan shuruudaha u yaala nidaamka dahabka ah ee "LEED gold standard". Waxaad halkan ka heli kartaa waxyaalo dheeraad oo ku saabsan shahaadada LEED: usgbc.org/leed.

**Muddo intee le'eg ayay qaadataa si loo dib loogu dhiso dugsi? Halkee ayay ardaydu aadaa wakhtigaasi?**
Dhismaha dugsigu wuxuu qaadan karaa laga bilaabo 12 ilaa 24 bilood, iyadoo ay ku xiran tahay baaxada dugsiga iyo inta uu le'eg yahay dadaalka shaqo ee wax dhisida. Qaarka mid ah mashaariicda la codsaday, sida Madison, shaqaalaha iyo ardaydu waxa ay si ku meel gaarka ugu guuri doonaan "meesha sida ku meel gaarka ah waxbarashada looga sii wadayo" ee ku taala Marshal, halkaasi oo ah halka ay ardayda Franklin hada wax ku bartaan inta laga casriyeynayo dugsigooda iyada oo halkaasi tahay halka ardayda Grant ay iyaguna wax ku baran doonaan sanadka soo socda.

Xaaladaha kale, sida ka dhacday Roosevelt, ardaydu waxaa laga yaabaa in ay sii joogaan dugsiga ay hada dhigtaan iyada oo bedelka dugsiga la dhiso loona yeelo wejiyo kala duwan ama laga dhiso qayb kale oo ka mid ah hantida dugsiga.

**Waa maxay sababta qaar ka mid ah dhismayaasha dugsiyada dib u cusboonaysiinta loogu sameeyay halkii laga bedeli lahaa?**
Go'aanka ah in si buuxda dib loogu cusboonaysiiyo ama si buuxda loo bedelayo dhisme duug ah wuxuu ku xiran yahay dhismaha dugsiga, sida loo dhisay iyo muuqaalka, meesha uu ku yaalo iyo baaxada shaqada ay tahay in la dhamaystiro.

Dugsiyada degmada ee magaalada hareeraheeda ku yaala inta badan waxay dugsiyo cusub ka dul dhisaan dhulka cagaaran (dhulka bannaan) oo aanan u baahnayn in meesha laga saaro dhismayaasha hada jira). Noocan wax dhisid guud ahaan waa mid hawl yar isla markaana dhaqaale ahaan kharash yar marka loo eego dib u horumarinta goobaha isla hadaba wax lagu dhigto. Si kastaba ha ahaatee, duminta dhismayaasha oo ay daba socdaan in la dhiso dhisme cusub ama dib loo cusboonaysiiyo waa kuwa kaliya ee u bannaan PPS. PPS waxay leedahay dugsiyo taariikhi ah. Haddii maalgelinta daymeed ee dugsiga la oggolaado, dhismayaasha taariikhiga ah ee la cusboonaysiin doono iyada oo la adeegsanayo maalgelinta daymeed oo dhismaha waxaa dib loogu cusboonaysiin doonaa hab waafaqsan tilmaamaha taariikhiga ah ee dhismaha iyo qaybaha dhismuhu ka kooban yahay, iyada oo la bixinayo jawi wax barid iyo waxbarasho oo cusub isla markaana wakhti dheer waara, oo leh dhamaystirnaan joogto ah. Macallimiinta, shaqaalaha iyo qoysasku waxay ku lug yeelan doonaan qorshaynta si ay taageero uga geystaan ilaalinta dhinacyada gaarka ee dugsi kasta iyo isdhexgalkooda bulshada ku wareegsan.

**Waa maxay baaxada uu leeyahay PPS?**
Dugsiyada Dadweynaha Portland waa dugsiyada degmo ee ugu weyn Oregon , iyada oo leh in ka badan 48,500 arday oo dhigata iyo in ka badan badan 90 goobood oo dugsiyo ah. Dugsiyada Dadweynaha Portland waa mulkiilaha labaad ee hantida ugu badan leh Portland iyo mid ka mid ah shaqo bixiyayaasha ugu weyn ee gobolka iyada oo leh in ka badan 5,000 oo macallin iyo shaqaalaha taageerada dugsiga.

In ka badan 10 arday 8 ka mid ah oo degan Portland ayaa dhigata dugsiyada PPS. 4 sano ee la soo dhaafay, isqorista PPS way korortay iyada gaartay in ka badan 1,000 arday iyada oo la saadaaliyay in ay isqoristu dhaafto 50,000 oo arday marka la gaaro 2022.

**Waa imisa jir dhismayaasha PPS?**
Qiyaasta da'da dhismayaasha PPS waa 77 sano jir. In ka badan kala bar dugsiyada PPS waxaa la dhisay bartamaha sanadihii 1940 ama ka hor. Ka hor maalgelintii daymeed ee Horumarinta Dugsiga ee 2012-kii, oo dib loogu dhishay ama lagu casriyeeyay Franklin, Roosevelt, Faubion iyo —qorshaha ay tahay in uu bilaabmo sanadkan—Grant, labada kaliya ee dugsi ee ay leedahay waxaa la dhisay 30 sano ee la soo dhaafay, Dugsiga Hoose ee Rosa Parks oo ku yaala Waqooyiga Portland iyo Forest Park K-5 oo ku yaala Waqooyi galbeed.

**Sidee baa PPS loo maalgeliyaa sidee baana loo kharash gareeyaa ilaha kala duwan?**
In ka badan boqolkiiba 80 dhaqaalaha guud ee PPS wuxuu ka yimaadaa taageerada gobolka iyo canshuuraha hantida degaanka. Inta soo hartay waxay ka timaadaa meelo kale.

Guud ahaan, in ka badan boqolkiiba 80 miisaaniyadda lacageed ee guud ee PPS waxaa lagu bixiyaa mushaharka shaqaalaha – in ka badan 5,000 oo macallin, kaaliyayaasha waxbarashada iyo shaqaalaha dugsiyada degmada laga soo bilaabo mas'uuliyiinta, wadayaasha basaska iyo shaqaalaha adeegyada nafaqada ilaa laga gaarayo xoghayayaasha, maamulayaasha iyo shaqaalaha xirfadda iyo farsamo.

- In ka badan boqolkiiba 70 dhaqaalaha PPS waxaa lagu kharash gareeyaa macallimiinta, manhajka iyo taageerada dugsiga..
- Gaadiidka, dayactirka dugsiga iyada oo kharashyada kale lacagtoodu dhan tahay boqolkiiba 17 oo ah miisaaniyadda PPS.
- PPS waxay boqolkiiba 4.7 oo ka mid ah ilaheeda ku kharash garaysaa maamulka dhexe.  Shaqaalaha PPS waxay bixiyaan qaybta kaga soo aada caymiska daryeelka caafimaad.  Shaqaalaha PPS waxay bixiyaan boqolkiiba 6 oo ah qaaraanka loogu talagay nidaamka hawlgabka ee shaqaalaha gobolka.

Sida ku cad  Mashruuca Buuga Furan ee Sabuuradda, “Chalkboard Open Books Project”,  PPS waxay qayb intaasi u dhiganta oo miisaaniyadeeda ka mid ah ku kharash garaysaa fasalka dugsiyada degmada (72%) sida Beaverton (72%) iyo Salem-Keizer (73%), iyada oo ah in ka badan qiyaasta guud ee gobolka (70%).